**GOBOLKA MAINE**

Maxkamadda Degmada
Goobta: ________________________________
Lambarka Galka ________________________

**TIXRAAC**:

**OGAYSIIS:** Foomkan waxaa loogu talagalay ujeedooyin tixraac oo kaliya. Fadlan ku buuxi af Ingriis qaybta Ingriiska ee foomkan. Haddii aad u baahan tahay caawin waxaad tagtaa Xafiiska Karaaniga waxaa laguugu yeeri doonaa adeegga turjumidda.

**AMAR KU SAABSAN ILMAHA OO QATAR KU JIRA**
**iyo Dib u Eegis Garsoor iyo Amar Qorsheyn Joogta ah**
☐ hooyada ☐ aabaha
Qodobka 22 ee Sharciyada Gobolka Maine ee Dib loo Eegay § 4035
(22 M.R.S. § 4035)

1. Maanta oo ah ________________________, ayadoo la raacayo shuruudaha Adeegyada Caruurta iyo Qoyska iyo Sharciga Ilaalinta Caruurta, 22 M.R.S. §§ 4001-4099-H, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha waxay Maxkamaddan u soo gudbiyeen Codsi Amar Caruur Ilaalin oo ku saabsan canuga (caruurta) kor ku xusan.
2. ☐ Isla taariikhdaas, Waaxdu waxay dalbatay heshayna Amar Hordhac ah oo Caruur Ilaalin. Dhageysi hordhac ah oo kooban ayaa loo balamiyay ________________________________________________________________.
   Isla taariikhdaas,
   ☐ ________________________________________ wuu soo xaadiray wuxuuna ka tanaasulay Amarka Hordhaca ah ayadoo la tixraacayo 22 M.R.S. § 4034(3);
   ☐ Dhageysigii ka dib, Maxkamaddu waxay sii waday fulinta Amarkii Hordhaca ahaa;
   ☐ Dhageysigii ka dib, Maxkamaddu waxbay ka badashay Amarkii Hordhaca ahaa, **ama**
   ☐ Dhageysigii ka dib, Maxkamaddu waa ay burisay Amarkii Hordhaca ahaa.
3. Mudane ________________________________________________ ayaa guddoominayay dacwadahaan.

4. Ayadoo la raacaya amarka Maxkamaddan, dhageysi ku saabsan Codsiga Amarka Caruur Ilaalinta ayaa loo ballamiyay ____________________. Marka laga reebo waxa halkaan ku xusan, dhammaan dhincyada, waqti iyo hab munaasab ah ayaa lagu ogeysiiyay dacwadda taagan.
   i. Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ☐ waa ay xareeysay ☐ ma xareeyn nuqul kamid ah ogeysiiska dacwaddaan oo loo soo gudbiyay the daryeelaha kaydka ah (waalidiinta ku meel gaarka ah, waalidiinta korshada ka hor, iyo/ama qaraabada daryeelka siiya). ☐ Maxkammada waxay halkaan amar ku bixineysaa in ogeysiis loo diro _____________________ sida soo socota: ___________________________________.
   ii. Dhallinyarada da'da munaasab ka ah jira ☐ waa la ogeysiiyay ☐ lama ogeysiinin dacwaddaan.
   ☐ Laguma dabaqi karo.
   iii. Canuga (caruurta) wuxuu galay daryeelka korinta kumeel gaarka ah taariikhda ___________________________.
   iv. Ogeysiis aan ku filnayn ayaa loo diray _____________________________. Maxkamaddu waxay halkaan amar ku bixinaysaa in ogeysiis loo diro ayada/asaga/ayaga sida soo socoto: _____________________________________.

5. Dhincacyada soo socda ayaa ku kulmay Maxkamadda:

| | |
|---|---|
| ☐ Hooyo ________________________________ | ☐ Qareenka Hooyada _______________________ |
| ☐ Aabo _________________________________ | ☐ Qareenka Aabaha ________________________ |
| ☐ Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha | ☐ Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Guud _______________ |
| ☐ Dhalinyaro ____________________________ | ☐ Qareenka Madaxa banaan ee Ilmaha (GAL)________ |
| ☐ Daryeel bixiyaha _________________________ | ☐ Ka qeyb gale _____________________________ |
| ☐ Kuwa kale _____________________________ | ☐ Soo dhax gale ____________________________ |

6. ☐ Taariikhda booqashada ugu dambeysay GAL-ka uu ku soo booqday canuga (caruurta): ____________________.
☐ Taariikhda warbixintii ugu dambeysay ee GAL-ka waa: _________________. Warbixinta oo GAL-ka ☐ waa loo aqbalay, ama ☐ looma aqbalin caddeyn ahaan waxaana loo qeybiyay dhinacyada.



Tixraac oo kaliya

7. ☐ Waxaa jira tallaabooyin raacsan oo aan wali lagu fulinin Maxkamadda ________________ oo ku saabsan xiriirka u dhaxeeya/ dhex mara dhinacyada ku lug leh kiiskaan.

☐ Waxaa jira Amar Maxkamadeed oo fulintiisu waajib tahay oo ay soo saartay Maxkamadda ____________________ oo mamnuucaya xiriirka u dhaxeeyo/ dhax mara dhinacyada iyo kuwa kale oo ku lug leh kiiskaan.

8. Waalidiinta oo soo xaadiray waxaa wax laga weydiiyey arrimiha aabbanimda.

☐ Majiraan arrimo aabbanimo oo ku saabsan dacwaddan, **ama**

☐ Arrimaha aabbanimo ee soo socda oo ku saabsan dacwaddan ayaa jira: ____________________________________
______________________________________________________________________________
______________________________________________________________________________

9. Waalidiinta waxaa la weydiiyay hadii ayaga, ama waalidiin kale oo maqan, ay ka soo jeedaan qabiilka Indian-ka ee aqoonsantahay dawladda federaalka ah.

☐ Maxkamaddu waxay go'aamisay in Sharciga Daryeelka Ilmaha Indian-ka ah aan lagu dabaqi karin dacwadaan, **ama**

☐ Maxkamaddu waxay go'aamisay in Sharciga Daryeelka Ilmaha Indian-ka ah uu ku dabaqmayo dacwadaan madaama uu canuggu yahay xubin ka diiwaan gashan ____________________________ ama waalidka uu yahay xubin ka tirsan __________________________, iyo canugga oo xaq u leh xubinimada qabiilkaas. Qabiilka waa la ogeysiiyay tariikhdu marka ay ahayd _________________________________.

10. ☐ Marka horeba, dhinacyada ku hor matalan Maxkamadda heshiis ayey ku ahaayeen natiijooyinka iyo hab u la dhaqanka dacwadaan; **ama**

☐ Maxkmadda waxay amarkaan soo saartay kadib dhageysi la is ku qabsaday.

11. ☐ Maxkamadda ayaa dib u eegtay caddaymaha la soo hordhigay, duruufaha ku hareereysan soo gudbinta Codsiga, tallaabooyinka ay qaadeen Waaxdu iyo waalidiinta ilaa taariikhdaan oo la xiriira canuga (caruurta), soo jeedinta Qareenka Madaxa banaan ee Ilmaha (Guardian *ad litem*), iyo qorshaha loo soo bandhigay canuga (caruurta). Iyadoo la tixgalinayo caafimaadka iyo ammaanka canugga (caruurta), iyo dhinaca ay caddeyntu u badantahay, maxkamadda waxaa u caddatay in canugga (caruurta) magaciisu kor ku xusan yahay uu ku jiro (ay ku jiraan) qatar ku aaddan cafimadkooda iyo daryeelkooda haduu jirin Amar Caruur Ilaalin.

Qatarta ku saabsan dacwaddaani waxaa lagu saleeyay arrimaha soo socda:

☐ Hooyada: ____________________________________________________________________________
______________________________________________________________________________
______________________________________________________________________________
______________________________________________________________________________

☐ Aabaha: _____________________________________________________________________________
______________________________________________________________________________
______________________________________________________________________________
______________________________________________________________________________

12. ☐ Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ☐ waxay sameysay ☐ ma sameynin dadaal macquul ah si looga fogaado baahida loo qabo in canugga (carruurta) laga qaado heynta waalidkooda. Dadaalkaas macquulka ah, hadii la sameeyay, waxaa ka mid ah waxa soo socdo: ____________________________________________
______________________________________________________________________________
______________________________________________________________________________

13. ☐ Waaxda loogama baahneyn in ay sameeyso dadaal macquul ah si looga hortago ka qaadidda canugga (caruurta) sababtoo ah Maxkamadda oo heshay sababaha soo socda oo khuseeyo waalidka oo culeys saari karo arrintaas: __________
______________________________________________________________________________

Tixraac oo kaliya

14. Heynta iyo Meelaynta

Ayadoo lagu saleynayo dib u eegidii kiiska iyo helitaanka xaalad qatar galineyso ilmaha, **MAXKAMADDU HALKAAN WAXAY KU AMREYSAA,** ayadoo la tixraacayo 22 M.R.S. §§ 4035 and 4036, in canugga (caruurta) _____ ______________________________________________

lagu dabaqo Amarka soo socda, laga bilaabo ______________________________.

A. ☐ Canugga (caruurta) waa in ay ku jiraan haynta ☐ waalidiinta ☐ hooyada ☐ aabaha ____________ ____________________ sida ay qeexayaan shuruuda soo socdo ____________ ____________________; **ama**

B. ☐ Canugga (caruurta) waa inay ku jiraan haynta kuwa kale ____________ ayadoo lagu saleynayo go'aankii Maxkamadda oo ahaa in sii joogidda guriga ay lid ku tahay daryeelka canugga (caruurta), **eeg qodobka 16 ee hoos ku xusan**; ama

C. ☐ Canugga (caruurta) waa inay ku jiraan haynta Waaxda ayadoo lagu saleynayo go'aankii Maxkamadda oo ahaa in sii joogidda guriga ay lid ku tahay daryeelka canugga (caruurta), **eeg qodobka 16 ee hoos ku xusan;**

☐ Haddii wax laga badelay haynta, isbaddelkaas waxuu u saameynayaa canugga (caruurta) sida soo socda: ____________ ______________________________________________.

**Meeleynta:**

☐ Meeleynta hadda jirta ____________________ waa mid lagama maarmaan oo ku haboon.
☐ Canugga (caruurta) wey ku nabad qabaan meeleynta hada jirta.
☐ Isbadellada lagu sameeyey meeleynta canugga (caruurta) waxaa loo sameeyay sababtoo ah ____________ ______________________________________________

canugga (caruuurta)-ne waxaa lagu wareejiyey ______________________________.

**Qaraabada:**

☐ Tallaabooyinka soo socda ayaa u baahan in la qaado si loo aqoonsado qaraabada kaydka ah inta aan lagaarin ballanta soo socota ee dacwada maxkamadda: ______________________________.
☐ Qaraabada soo socota ayaa la aqoonsaday Waaxduna waxey baareysaa/ soo baari doontaa haddii ay qaraabadu doonayaan awoodna u leeyihiin in ay u noqdaan meeleyn joogta u ah caruurta: ____________________.
☐ Ma jiraan wax qaraabo ah oo canugga (caruurta) lagu wareejiyo.

**Dallinyarada 16 jirka ah am ka weyn**

☐ Canugga (caruurta) waxuu jiraa 16 sano ama waa uu ka weynhay. Si looga wareejiyo qoyska kaydka ah oo lagu wareejiyo nolol madax bannaan, canugga (caruurta) waa in la siiyo ☐ Barnaamijka Waaxda ee Nolosha Madaxa Bannaan iyo/ama ☐ adeegyada soo socda: ______________________________.

**Meeleyn ka baxsan gobolka:**

☐ Canugga (caruurta) waxaa la dhigaa ______________________________.
  ☐ Qorshahaan waa midka ugu wanaagsan danta canugga (caruurta) waayo waa lagama maarmaan in la daboolaa baahida gaarka ah ee canugga (caruurta) ______________________________.
  ☐ Daraasad ku saabsan Hishiiska ka Dhaxeeya Gobollada ee Meeleynta Ilmaha ayaa amar lagu bixiyay sida soo socda ______________________________.

**Kuwa kale:**

☐ Canugga (caruurta) wuxuu ku jiraa/ku jiraan dugsiga __________ kuma jiro/ kuma jiraan dugsiga __________.
☐ Xiriirka waxbarashada oo ku saabsan arrimaha dugsiga: ______________________________.

☐ Amar kale: ______________________________



Tixraac oo kaliya

15. Qorsheynta Joogtada ah (haddii ay khuseyso)

Haddii ay canugga (caruurta) ay ku jiraan haynta Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadahana, qorshe joogta ah waa loo sameeyaa canugga (caruurta) ugu dambeyn (12) bilood laga bilaabo taariikhda canugga (caruurta) lagu wareejiyay Waaxda ayadoo la tixraacayo 22 M.R.S. § 4038-B.

Waaxdu waxay sameysay dadaal macquul ah si loo soo gabagabeeyo qorshe joogta ah oo loogu talagay canugga (caruurta). Dadaalkaas macquulka ah waxaa ka mid ah kuwa soo socda: ___________________________________________.

Qorshaha joogtada ah oo loogu talagalay canugga (caruurta) waa:

- ☐ In dib loogu celiyo ☐ walidiinta ☐ hooyada ☐ aabaha ☐ dad kale: ____________________________________.
  Taariikhda ay ugu badantahay in dib loogu celiyo laguna sii hayo guriga si ammaan ah waa __________________.
- ☐ Korsasho sharci ah. Codsi Joojin waa in la faylgareeyaa taariikhda __________________________
- ☐ Meeleyn Joogta ah oo lagu wareejinayo ilamaha qof qaraabo ah diyaar ah oo ogol. Taariikhda ay ugu badantahay in lagu wareejiyo canugga (caruurta) qaraabada waa ___________________________
- ☐ Meeleyn Joogra oo lagu wareejinayo masuul sharci ah. Taariikhda ay ugu badantahay in lagu wareejiyo canugga (caruurta) masuulka sharciga ah waa _______________________________
- ☐ U gudbinta masuul sharci ah. Taariikhda ay ugu badantahay in lagu wareejiyo canugga (caruurta) masuul sharci ah ________________________________________________________________________________.
- ☐ Heshiis qorshe nololeed kale oo joogta ah. Waaxdu waxay diiwaan galisay sababaha soo socdo oo ku qasbtay in la sameeyo heshiis qorshe nololeed kale oo joogta ah: ______________________________________________
- ☐ Maxkmaddu waxay tixgalisay rabitaanka canugga (caruurta), qaab ku munaasab ah da'da canugga (caruurta).

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegaha Aadanaha waa in ay siisaa adeegyada soo socdo si ay u fududeyso gaaritaanka Amarka Qorsheynta Joogta ah: ________________________________________________________________
☐ waalidiinta ☐ hooyada ☐ aabaha ☐ dad kale _________________________ waa inay ka qayb galaan adeegyada soo socdo si loo fududeeyo gaaritaanka qorshaha joogtada ah: ______________________________________________
________________________________________________________________________________________________

16. Dib u mideynta <u>Ogeysiis</u>**: Waa in laqabto Dib u Eegis Garsoor muddo 6 bilood kudeheed laga bilaabo marka canugga la qaaday ayadoo la raacayo Amar Ilaalin oo Hordhac ah ama muddo 6 bilood laga bilaabo hilitaanka xaalad halis ah hadii uusan jirin Amar Ilaalin oo Hordhac ah. Sidaa darteed, haduu Amarkaan matalayo Dib u Eegista Garsoor ee koowaad, kiiskuna leeyahay Amar Ilaalin oo Hordhac ah, qaybtaan waa in la buuxiyaa.**

A. Waaxdu ☐ waxay sameeysay ☐ ma sameynin dadaal macquul ah si lagu mideeyo laguna dhaqan celiyo qoyska. Dadaalkaas macquulka ah, hadii la sameeyay, waxaa kamid ahaa: _______________________________________.

B. ☐ Waaxda waxaa looga baahanyahay in ay kala qaybqasho dadaalka dib u mideynta ☐ walidiinta ☐ hooyada ☐ aabaha kuwa kale: ____________________________________________________________________________.

C. Baaxadda u hoggaansanaanta hooyada qorshaha kiiska, oo uu ka mid yahay sameynta horumar ku wajahan fududeynta sababta keentay meeleynta iyo arrinkasta oo cusub oo abuuri karta xaalad halis ah, u hoggaansanaantaasi waxay ahayd mid ☐ aan la aqbali karin ☐ iska fiican ☐ wanaagsan __________________________________________.
Adeegyada iyo arrimaha la rajeynayo waa in lagu qeexo qorshaha dib u mideynta oo taariikhdiisu tahay ____________.
Nuqul qorshaha dib u mideynta taariikhdiisu tahay ________ wuxuu ku jiraa fayl-ka maxkamdda, waana inay ku jiraan arrimaha dheeraadka ah ee soo socda: ____________________________________________________.

D. Baaxadda u hoggaansanaanta aabaha qorshaha kiiska, oo uu ka mid yahay sameynta horumar ku wajahan fududeynta sababta keentay meeleynta iyo arrinkasta oo cusub oo abuuri kara xaalad halis ah, u hoggaansanaantaasi waxay ahayd mid ☐ aan la aqbali karin ☐ iska fiican ☐ wanaagsan __________________________________________.
Adeegyada iyo arrimaha la rajeynayo waa in lagu qeexo qorshaha dib u mideynta oo taariikhdiisu tahay ____________.
Nuqul qorshaha dib u mideynta taariikhdiisu tahay ________ wuxuu ku jiraa fayl-ka maxkamdda, waana inay ku jiraan arrimaha dheeraadka ah ee soo socda: ____________________________________________________.



Tixraac oo kaliya

E. ☐ Qorshe dib u mideyn ama qorshe looga fogaanayo ka saaridda canugga (caruurta) guriga oo taariikhdiisu tahay __________________________ ayaa ku lifaaqan halkaan waxaana loogu daray halkaan si tixraac ah **ama**

☐ Waaxda waa laga cafiyay inay qorshe ugu soo faylgareyso Maxkamadda taariikhdaan sababata macquulka ah oo socoto awgeed: ____________________

☐ Qorshe dib u mideyn ama qorshe looga fogaanayo ka saaridda canugga (caruurta) guriga ayaa laga rabaa inay Waaxdu soo faylgareyso nuqulna waa in la siiyaa dhinacyada xilli aan kadambeyn ____________________

17. Joojinta Dib u Mideynta

☐ Waaxda ayaa hore looga cafiyay waajibaadkeeda ku aadan dadaalka dib ula mideynta ☐ hooyada ☐ aabaha ayadoo la raacaya Amarka taariikhdiisu tahay: ________________________.

☐ Waaxda ayaa laga cafiyay waajibaadkeeda inay ku dadaasho dib ula mideyn:

☐ walidiinta ☐ hooyada ☐ aabaha ☐ kuwa kale: ____________________

☐ sababaha soo socda awgood:

☐ sabab culeys saareysa ayaa la helay (waa in la qabtaa dhageysi qorsheyn joogta ah muddo 30 maalmood)

☐ sii wadidda dadaalka dib u mideynta ayaan waafaqsaneyn qorshaha joogtada ah oo loogu talagalay canugga (caruurta)

☐ kuwa kale ____________________

18. Booqashada iyo xiriirka (hadii lagu dabaqi karo) waa inay waafaqsanyihiin danaha ugu wanaagsan ee canugga (caruurta) sida soo socda: ____________________

☐ sida ay dhinacyadu ku hishiiyeen

☐ sida soo socota: ____________________

19. Masruufka Ilmaha

**WAXAA AMAR DHEERAAD AH LAGU SII BIXIYAY**, ayadoo la tixraacayo 22 M.R.S. § 4036(1)(G), in:

☐ Wixii Amar Masruuf Caruur oo jira ama Amar Maamuleed oo Masruuf Caruur wuu si jirayaa isagoo leh awood fulineed oo buuxda.

☐ Waalidka (waalidiinta) waa inay bixiyaan masruufka canugga sida ku xusan Amarka Masruufka Caruurta oo halkaan ku lifaaqan waxaana loogu daray Amarkaan tixraac ahaan. Amarka Xayiraada Dahkhliga oo halkaan ku lifaaqan (haduu jiro) ayaa isagane tixraac ahaan loogu daray.

☐ Waxaa intaa dheer, ______________________________ waa inuu siiyaa caymis cafimaad/daaweyn canugga (caruurta) inta uu ka helayo caymis shaqadiisa/shaqadeeda, waana inuu u keenaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha caddeyn ku saabsan caymiskaas, **iyo/ama**

☐ 10 maalmood guduhood, waa inay walidiintu u soo faylgareeyaan Maxkamadda qoraal dhaar ah oo kusaabsan dhaqalahooda. Haddii aan lasoo faylgareynin qoraalkaas dhaarta ah waxaa dhici karta in la soo saaro amar masruuf oo ku saleysan macluumaadka horyaala maxkamadda.

20. **WAXAA AMAR DHEERAAD AH LAGU SII BIXIYAY** inay arrintaan ay maxkamaddaan dib u sii eegto:

☐ Maalinta ___________________ saacadda ____________ subaxnimo/ galabnimo; ama 6 bilood guduhood laga bilaabo taariikhda amarkaan, ama ka hor hadduu dhinac soo codsado. Hirgalinta Amarkaan sida hoos ku xusan waxay mataleysaa ogeysiis ku filan ballanta Dib u Eegista. Looma baahna ogeysiis dheeraad ah; **ama**

☐ Ayadoo lagu saleynayo dalabka dhinac kamid ah dhinacyada:

☐ Haynta waxaa lagu wareejiyay qof kale oo aan ahayn Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ama waalidka: 22 M.R.S. § 4038(1-A)(A); **ama**

☐ Haynta waxaa lagu wareejiyay waalidka oo aanan haysanin canugga (caruurta) xilliga la faylgareeyay Codsiga. 22 M.R.S. § 4038(1-A)(B).

**Karaaniga waa inuu galiyaa waxyaaba soo socda galka kiiska:**

Amar ku saabsan ilmaha oo qatar ku jira taariikhdiisu tahay ___________ ayaa la faylgareeyay. Halis ayaa lagu helay/ laguma helin ☐ waalidiinta ☐ hooyada ☐ aabaha si loo __________________________________.



Tixraac oo kaliya

☐ Haynta canugga (cauruurta) waa inay sii haystaan ________________________________________________________.
☐ Meeleynta caruurta waa inay sii jirtaa/lagu meeleeyo haynta ______________________________________________.
☐ Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha waa laga cafiyay waajibkeedii ahaa inay ka shaqeyso adeegyada dhaqan celista iyo dib u mideynta ku aaddan _____________ ☐ sababta oo ah jiritaanka arrimo culeys saarayo.
☐ ______________________________ waxaa lagu daray kiiskaan si ____________________________ ahaan.
☐ Dib u Eegis Garsoor ah waa la sameeyay.
☐ Dhageysi Qorshe Joogta ah ayaa la qabtay.
☐ ______________________________ ayaa lagu amray inuu siiyo Waaxda masruufka canugga lacagtaas oo dhan _____ _______ dollar oo bixinayo toddobaad walba/labadii toddobaadba/ bil walba.
☐ Dhagaysi Dib u Eegis Garsoor / ☐ Qorsheyn Joogta ah ☐ ama kuwa kale ________ ayaa loo qabtay ____________.

Iyadoo la tixraacayo M.R. Civ. P. 79(a), Amarkaan waxaa lagu daray galka kiiska tixraac ahaan iyadoo la raacayo amarka gaarka ah ee Maxkamadda.

Date: ____________________________ ______________________________________________
Qaali, Maxkamadda Degmada,ee Gobolka Maine

**OGEYSIIS KU SOCDA DHINACYADA**

Halkaan ayaa la idinku ogeysiiyay in, ayadoo la tixraacayo 22 M.R.S. § 4038, aad xaq u leedihiinn in aad soo gudbisiin Dalab Dib u Eegis Garsoor adinkoo raadinaya in wax laga baddelo Amarkaan Caruur Ilaalinta ah.

**GAARSIINTA AMARKA**

Dhinacyada ayaa lagu gaarsiiyay nuqullada Amarka ☐ gacanta ☐ diray boostada caadiga ah dadka soo socda:

☐ Kaaliyaha Xeer Ilaaliyha Guud
☐ Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanah
☐ Qareenka hooyada/ hooyada oo ayada is mataleysay
☐ Qareenka aabaha/ aabaha oo isaga is matalayey
☐ Qareenka Madaxa banaan ee Ilmaha (Guardian ad litem)
☐ Soo dhex gale: _________________________________
☐ Kuwa kale: ____________________________________
☐ Xafiiska Difaaca Gaarka ah oo ay Maxkamddu Magaabday ee Maine, hadii lagu dabaqi karo ________________

Date: ____________________________ ______________________________________________
Karaaniga Maxkamdda Degmada

Tixraac oo kaliya